Washington State Department of CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

Nidaamka Xaadiriska Elektorooniga ah

# Xaashiyaha Dhakhso u Bilaabidda

**KinderConnect** waa barnaamij websayt ku salaysan oo lagu isticmaalo laabtob ama kombiyuutar. Bixiyayaashu waxay u isticmaalaan KinderConnect duwaagalinta, sixitaanka, iyo gudbinta xaadiriska daryeelka ilmaha ee taageerada hela iyo inay ku daraan oo wax ka baddalaan hawlwadeenada, kafaale-qaadayaasha iyo macluumaadka ilmaha iyo jadwallada daryeelka.




**KinderSign** waxay baddashay waraaqihii xaadiriska. KinderSign waa barnaamij moobil kaasi oo ku shaqeeya barnaamijka taablet-kaaga ama iPad-ka waxaana isticmaala kafaale-qaadayaasha si ay u xaadiriyaan imaanshaha iyo bixista ilmaha ee daryeelka.




**KinderSmart** waa barnaamij ku shaqeeya taleefanka casriga ah ama iPhone-ka kafaale-qaadaha. Kafaale-qaadayaashu waxay isticmaali karaan KinderSmart si ay u xaadiriyaan imaanshaha iyo bixista ilmaha ee daryeelka.




## Taageero iyo Caawimo

https://www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/electronic-attendance-system/training

- **Xaashiyaha Dhakhso u Bilaabidda**
- **Kaadhadhka Tixraaca Dhakhsaha ah (QRC)**
- **Fiidyowyada "Sida la Yeelo"**
- **Saacadaha Shaqada ee Xafiiska Caawimada**

**Miiska Caawimada 1-844-704-6777**

Isniinta ilaa Jimcaha, 8 g.h. ilaa 5 g.d.

**Iimeel** eas.servicedesk@dcyf.wa.gov

## Doorarka

**Bixiyayaashu** waxay bixiyaan adeegyada daryeelka ilmaha. Bixiyayaasha waxa ka mid ah xarumaha liisanka haysta, guryaha iyo Qoys liisanka haysta, Saaxiibada, iyo daryeel bixiyayaasha Jaarka (FFN).

**Hawlwadeenadu** waa shaqaale ama dad kale oo isticmaala KinderConnect si ay u maareeyaan duwaanada xaadiriska ee bixiyayaasha.

- **Maamulaha Bixiyaha:** Agaasimaha ama maamulaha xarun liisan haysta ama FNN.
- **Isticmaalaha Bixiyaha:** Macallimiinta ama kaaliyayaasha.

**Kafaale-qaadayaashu** waa waalidiinta, koriyayaal, ama dadka kale ee waawayn ee loo oggol yahay kuwaasi inay la socdaan ilmaha ama ka bixiyaan ama geliyaan xarunta caruurta.

**Ilme** waxa loo tixraacaa carruurta ka hesha daryeelka bixiyaha. Xaadiriska carruurta hesha taageerada waa in la gudbiyo iyada oo la adeegsanayo KinderConnect.

Macluumaadkaaga galitaanka KinderConnect ayaa laguugu soo diri doonaa iimeel 10 maalmood gudahood kadib dhammaystirka tabobarka.

Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

# Sida loo samaysto Nidaamka Xaadiriska Elektorooniga ah

## Cinwaanada (menu) KinderConnect

KinderConnect | Home | Admin | Operators | Reports | Attendance | Providers | Children | Sponsors | Devices

- Diiwaanka hawsha ee caawimada DEL
- Maamulidda dadka isticmaalaya KinderConnect
- Dib u eegid, wax ka baddal, ansixin iyo gudbin duwaanada xaadiriska iyo warbixinaha
- Warbixinaha Xaadirista / duwaangalinta aaladda
- Goobta daryeelka ilmaha
- Waxaa ku yaala carruurta la taageero oo ay DSHS galinayso. Kuwa aan la taageerin oo gacanta lagu galinayo
- Waalidiinta iyo dadka waawayn ee loo oggol yahay inay carruurtooda keenaan oo qaadaana
- Aaladaha Duwaanga shan

## 1

**Dhammaystirka abuurista Maamulka marka aad hesho macluumaadkaaga galitaanka Maamulka**

A. Cinwaanka Hawlwadeenka, dooro Search oo baadh magacaaga.
B. Riix Account oo ku yaala dhinaca midig ee shaashadda, qaybta magacaagu kujiro.
C. Abuur PIN shan god ah, riix sanduuqa saquuda diiwaanka haddii aanu doornayn, kadibna riix Save.

**A**

**Operator Search**

First Name:
Last Name:
District: Select All
Operator Type: Select All
Status: Select All

Search | Clear

Gali magacaaga

Riix Search

**B**

**Search Results**

| Operator Name | Region | Operator Type | Status | Providers | Account |
|---|---|---|---|---|---|
| Animatem, Rick | King | Provider Administrator | Active | Awesome Care | Account |

Riix Account oo ku yaala qaybta magacaagu kujiro

**C**

**Operator Account**

Operator Name: Animatem, Rick

Save | Cancel

★ denotes a required field
User Name: ★ rchasin
Password: ★ ••••••••••
Secret Question: ★ What is your father's middle name?
Secret Answer: ★ Edward
PIN: ••••
Reset Password: ☐
Locked: ☐
Registered: ☑

Abuur PIN shan god ah
Sax Registered, kadibna Riix Save

Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

# Sida loo samaysto Nidaamka Xaadiriska Elektorooniga ah

2

## Samee hawlwadeeno dheeraad ah

Hawlwadeenada dheeraadka ah waa in la sameeyo marka loo baahdo. Xarumuhu waxa dhici karta inay leeyihiin ka badan hal maamul bixiye waxaana dhici karta inay leeyihiin isticmaalayaal bixiye oo badan.

A. Cinwaanka Operator, Riix Detail, kadibna ka dooro New bogga Operator's Detail oo ku dar macluumaadka hawlwadeen cusub. Riix Save.
B. Shaashadda Operator Detail, ka dooro Operator menu/Account. Hawlwadeenka cusub ha dhammaystiro macluumaadkiisa akownka, kadibna ha riixo Save.

A




B




Hawlwadeen kastaa waa inuu galiyaa magac isticmaale, baasweedh, su'aasha sirta ah iyo PIN. Haddii aad tan u dhammaystirto hawlwadeenka, dooro reset password kadibna marka xiga ee hawlwadeenku galo, waxa loo tilmaami doonaa inuu galiyo baasweedh cusub.

Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

# Sida loo samaysto Nidaamka Xaadiriska Elektorooniga ah

3

**Xaqiiji oo ku dar carruur iyo kafaale-qaadayaal**

A. Cinwaanka Children, ka dooro Search, kadibna riix badhanka Search si aad u aragto una xaqiijiso liiska carruurta taageerada hesha ee daryeelkaaga.
B. Ku dar carruurta kharashka gaarka looga bixiyo iyo jadwalka (ikhtiyaar).
C. Ku dar kafaale-qaadayaasha (dhammaan dadka waawayn ee xaadirin doona imaanshaha iyo ka bixista carruurta ee daryeelka). Carruurta taageerada hesha waxa si toos ah u galiya kafaale-qaadaha ugu horrayn.

A



| Child Name | Child ID | CIN | Date of Birth | Providers | Sponsors | Type | Account |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Brice, Abe | 13 | | | Bigheart Day Care | Brice, Jane Brice, Jim Brice, Joe | Subsidized | Account |
| Brice, Charlie | 15 | | 4/4/2006 | Bigheart Day Care | Brice, Jane Brice, Jim Brice, Joe | Subsidized | Account |
| Brice, Kenny | 91 | | 3/3/2013 | Bigheart Day Care | Brice, Jane Brice, Jim Brice, Joe | Subsidized | Account |



B




C



Washington State Department of CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

# Sida loo sameeyo, waxa looga baddalo oo loo gudbiyo duwaanada xaadiriska

**Wakhtiyada galidda iyo bixidda**
Qaybta buluugga ah: Kafaale-qaadaha ayaa galiyay wakhtiga isagoo isticmaala KinderSign ama KinderSmart.
Qaybta cad: Hawlwadeenka ayaa galiyay ama wax ka baddalay wakhtiga KinderConnect.

Dhabarka caddaanka ah ama buluugga caddaatiga ahi waxa loo jeedaa ilmaha waxaa loo oggolaaday daryeel maalintaas.

Marka dhabarku buluug yahay waxa loo jeedaa Xaadiriska waa la gudbiyay.




Dhabarka danbariga ahi waxa loo jeedaa taariikhdaa looma oggolaan taageero.

Dhabarka huruudda ahi waxa loo jeedaa waxaa jira xog maqan.

Dhabarka casaanka ahi waxa loo jeedaa qaabaynta (foormaatin) ayaa khaldan ama wakhtiga laga baxay waxa uu ka horreeyaa wakhtigii la galay.

## Gudbinta Xaadiriska




1 Riix Submit si aad dib u eegis ugu samayso xaadiriska.

Riix Correct si aad wax uga baddasho duwaanka xaadiriska ilmaha.

Haddii wax khalad ahi ku jiro xaadiriska, magaca ilmaha ayaa casaan ah sidoo kalena xaaladda ayaa muujin doonta ma dhammaystirna ama lama soo xaadirin.

## 4 Wax ka baddalka iyo gudbinta duwaanada xaadiriska

- Xaadiriska waa in bishiiba mar la gudbiyo.
- Midabada dhabarka ee huruudda iyo casaanka ah waxay muujinayaan khalad.
- Riix Save kadib samaynta isbaddalada
- Marka xaadiriska oo dhan sax yahay, riix Submit.

Washington State Department of CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

Nidaamka Xaadiriska Elektorooniga ah

# Barnaamijka Taablet-ka KinderSign / iPad Xaashida Dhakhsaha ah

Waxaad galisaa halkan koodhka QR ee aad ka heshay xaashida Galitaanka Moobilka Bixiyahaaga.

## Bilaabidda KinderSign

- Daar taablet-ka ama iPad-ka
- Fur Barnaamijka KinderSign
- Ka sawirkoodhka *Xaashida lagu Duwaangaliyo Moobilka Bixiyaha* oo liiska carruurta ayaa kuu muuqan doona.

## La Socoshada Imaanshaha iyo Bixista Carruurta Daryeelka iyada oo la isticmaalayo taabletka




Dooro magaca ilmahaaga.
Ka dooro magacaaga liiska dadka loo oggolaaday ilmahan inay keenaan ama ka qaadaan daryeelka.

***Ka waran haddii uu magacaygu ka maqan yahay liiska?***
Maamulaha ka dalbo in uu ku galiyo nidaamka.




Gali PIN-kaaga oo taabo Verify.

***Ma markii kuugu horraysey ayaad isticmaalaysaa?***

- La xidhiidh maamulaha si uu kaaga caawiyo sidii aad u samaysan lahayd PIN.
- Isticmaal pin-kan markasta oo aad galayso ama aad baxayso.




Taabo Sign In ama Sign Out ilme kasta.

Magacaaga fartaada ku saxeex oo taabo Submit. Waad dhammaysay!

### 5 Sida loo duwaangalinayo taablet aa iPad si loo xaadiriyo in uu ilmuhu yimi ama ka baxay daryeelka

- Ku shub barnaamijka KinderSign.
- Ka gal KinderConnect kombiyuutarkaaga, riix cinwaanka Report oo riix Reports liiska hoos u furma.
- Dooro *KinderSign Tablet Registration Form*.
- Riix scan taablet-kaaga / iPad-ka oo ka sawir koodhka QR shaashadda kombiyuutarkaaga. Hadda waa lagu duwaangaliyey.

Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

Nidaamka Xaadiriska Elektorooniga ah

# Barnaamijka taleefanka KinderSmart Xaashida Dhakhsaha ah

## La Socoshada Imaanshaha iyo Bixista Carruurta Daryeelka iyada oo la isticmaalayo taabletka

Fur barnaamijka KinderSmart ee taleefankaaga ama iPhone-ka.

Sawir koodhka QR.



Waxaad galisaa halkan koodhka QR ee aad ka heshay xaashida Galitaanka Moobilka Bixiyahaaga.




Taabo Sign In, Sign Out ama Absent ilme kasta.

Marka dhammaan carruurtu la galiyo ama laga saaro, taabo Done.




Magacaaga ku saxeex adiga oo fartaada adeegsanaya.

Taabo Submit.

6

### Sida loo duwaangalinayo Taleefan / iPhone si loo ogaado in uu ilmuhu yimi ama ka baxay daryeel

- Maamuluhu waxa uu ku jiraa KinderConnect.
- Baadh kafaale-qaadaha ama ku dar mid cusub.
- *Ka daabac Mobile Registration Sheet* shaashadda faahfaaihnta kafaale-qaadaha.
- Kafaale-qaaduhu wuxuu ku shubaa oo uu ku furaa barnaamijka KinderSmart taleefankiisa.
- Taabo scan una dhaqaaji kamerada taleefanka casriga ah ee kafaale-qaadaha xagga koodhka QR ee ugu horreeya.
- Mar labaad taabo scan oo kamerada taleefanka dul gee koodhka labaad ee QR si aad u caddayso duwaangalinta taleefanka kafaale-qaadaha.
- Taleefanka waa la duwaangaliyay waana la isticmaali karaa.